

GOBOLKA SAN DIEGO

# Baro Miisaaniyada Gobolka

Miisaaniyada Lagu talliyay 2024-25


**Sarah E. Aghassi**

Madaxa Sarkaalka Maamulka Ku meelgaarka ah

**L. Michael Vu**

Caawiyaha Madaxa Sarkaalka Maamulka

**Ebony Shelton,** Madaxa Sarkaalka Maaliyada/Maareeyaha
Maaliyada Guud iyo Kooxda Dowlada Guud

**Dhaqtar Eric McDonald,** Agaasimaha Hay'ada Ku meelgaarka ah/Maareeyaha
Guud ee Caafimaadka iyo Hay'ada Adeegyada Insaanka

**Dahvia Lynch,** Maareeyaha Guud ee Ku meelgaarka ah
Isticmaalka Dhulka iyo Kooxda Jawiga

**Holly Porter,** Maareeyaha Guud
Kooxda Badqabka Dadweynaha

# Guddiga ee Kormeerayaasha



Nora Vargas
Kormeeraha
Degmada 1



Joel Anderson
Kormeeraha
Degmada 2




Terra
Lawson-Remer
Kormeeraha
Degmada 3



Monica
Montgomery Steppe
Kormeeraha
Degmada 4



Jim Desmond
Kormeeraha
Degmada 5



# Fariin ka timid Madaxa Sarkaalka Maamulka Ku meelgaarka ah



Sarah E. Aghassi
Madaxa Ku meelgaarka
Sarkaalka Maamulka

Gobolka San Diego waa gobolka leh ku dhawaad 3.3 milyan dad. Waxaa jiro wax badan ee laga jeclaado meeshaan waxaan ugu yeernaa guriga.

Ku dhawaadka cabirka juquraafiga ee Connecticut, gobolkeena waa meel ay aadaan ku dhawaad marti 32 milyan ah sannadkiiba. Waxay hoy u tahay dagayaal kala duwan oo cajiib ah oo ku nool, kana shaqeeya iyo ku raaxeysta meel ay ku jiraan xeebaha, buuraha, saxaraha iyo qaar ka mid ah meelaha deegaanka dhifka ak iyo gaarka ah ee wadanka.

Ururkeena wuxuu masuul ka yahay bixinta adeegyo badan si loo taageero gobolkoo dhan – waxyaabaha sida baaritaanada cuntada iyo maqaayada, baaritaanka tayada biyaha xeebta iyo gacanka, doorashooyinka, adeegyada bulshada, barnaamijyada caafimaadka dadweynaha, daryeelka koriinta, adeegyada illaalada dadka weyn iyo wax badan.

Bulshooyinkeena aan rasmiga aheyn, waxaan bixinaa dhammaan waxyaabahaasoo dhan sidoo kale sida adeegyada nooca caasimada, laga bilaabo illaalada dabka iyo dayactirka wadooyinka iyo degmooyinka xakameynta fatahaada ee maktabadaha, darjiimaha, fullinta sharciga iyo go'aan gaarista isticmaalka dhulka ee qaabeyso bulshooyinkeena ee jiilalka soo socda. Bulshooyinka ku jira aagaga aan rasmiga aheyn ayaa ka kooban qeyb weyn oo gobolka. Dhab ahaantii, haddii aagga aan rasmiga aheyn ay aheyd caasimad, waxay noqon laheyd tan labaad ee ugu weyn gobolkeena marka laga eego shacab ahaan iyo juqraafi ahaan ka weyn isku darka Rhode Island iyo Delaware.

# Fariin ka timid Madaxa Sarkaalka Maamulka Ku meelgaarka ah *(sii socoto)*

Marka la yaab ma ahan in miisaaniyada Gobolkeena—$8.48 bilyan—iyo doorka ay ka ciyaarto nolosha qof walba oo ku nool iyo soo booqdo halkaan, ay sidoo kale muhiim tahay.

Waxaan ku dhisnaa miisaaniyadeena qiyamkeena asaasiga ah—lahaanshaha, sinnaanta, helitaanka, waaritaanka, daacadnimada iyo heer sare.

Oo ma sameyn karin caawintaada la'aanteeda; oo inaan kugula kulano bulshooyinkeena, ku aruurinta fikradahiina sahano iyo inaan kagala qeybgalno onleenka, waxaan ognahay inaad tihiin jaalalkeena ugu fiican ee horay loogu sii wado gobolka.

Shaqadeena wadajirka ah darteed, kan waa miisaaniyad aan bixin kaliya adeegyada muhiimka ah ee aan dhammaanteen ku tiirsanahay; waxay sidoo kale ku dadaashaa inay isbadel ku sameyso aagaga sida sii kordheyso u saameynayo bulshadeena.

Guriyeynta waa mid ka mid ah arrimaha ugu daran ee waqtigeena, oo waxaan ka shaqeyneynaa inaan si weyn u yareyno guri la'aanta oo aan u abuurno wax la goyn karo oo dhammaan heerarka daqliga. Miisaaniyadaan cusub waxaa ka mid ah maalgelinada illaha loogu tallogalay dadka ay haysato guri la'aanta si ay u siiyaan gelitaanka hoy, guri iyo adeegyo, iyo sidoo kale 30 milyan oo doolar ee loogu tallogalay illaha lagu dhiirogeliyo in lagu awoodo guryaha oo looga saaro caqabadaha wax soo saarka guryaha.


# Fariin ka timid Madaxa Sarkaalka Maamulka Ku meelgaarka ah *(sii socoto)*

Waxaad sidoo kale arkeysaa in miisaaniyadeena ay sii wado maalgelinta barnaamijyada go'an ee badqabka ee caawiya in ka badan 1 milyan oo degayaasha nugul – hubinta helitaanka barnaamijyada sida CalFresh iyo Medi-Cal – si loo hubiyo in dadka ay haystaan cunto, adeegyada caafimaadka iyo taageerada maaliyada ee ay u baahanyihiin.

Gobolka waxaa ka go'an waaritaanka iyo yareynta saameynada isbedelka cimilada, maalgelinta illaalinta harka biyaha, ku darista xarumaha dadweynaha ee jaajgareynta baabuurta elektarooniga ah, iyo ku beerista kumanaan geedo ah iyada oo sidoo kale uga tarjumeysa ballanqaadkaas howlgaladeena wata qorshaha loogu yareynayo qiiqa kaarboonka ee xarumaha Gobolka boqolkiiba 90% xiliga 2030.

Intaas waxaa dheer, miisaaniyadaan waxay joogteyneysaa maalgashiyadeeda kooxda Gobolka San Diego, shaqaalaha oo ku faana inay kuu adeegaan, koox ah wadnaha iyo ruuxa dhammaan waxa aan sameyno, koox dooneysa inay isbedel sameeyaan.

Waxaa jira wax badan oo dheeraad ah oo lagu sahaminayo miisaaniyada lagu taliyay iyo wax badan oo laga baranayo maalgashiyada lagu sameeyay gobolkaan aad ayaan ugu faraaxsannahay inaan ugu yeerno guri. Waxaan idinku casuumayaa inaad ka fiirisaan websaydka miisaaniyadeena furan. Si wadajir ah, waxaan dhiseynaa gobol ka wanaagsan – meel aanan ugu yeerin kaliya guri, laakiin mid meeshaasoo qof walba oo naga mid ah uu si dhab ah u joogi karo guriga.



# Ururka

## Hamiladeena

Mustaqbal cadaalad ah, waara oo adkeysi leh oo dhammaan ah.

## Sinnaanta Miisaaniyada ee Socdo

Miisaaniyada waaxda waa inay muujisaa sida ay u caawiyaan bulshooyinka iyo dadka taariiq ahaan la heybsooco iyo nugul iyadoo la isticmaalayo aaladaha ay sameeyeen Xafiiska Sinaanta iyo Cadaalada Jinsiyada ee tixgelisaa ka qeybgelinta bulshada, xogta iyo isla xisaabtanka.

### Sida ku saleysan Qiyamyada

- Ka mid ahaanshaha
- Waaritaanka
- Heerka sare
- Hlitaanka
- Sinnaanta
- Daacadnimada


# Muxuu Gobolka Qabtaa



18 Caasimadaha aan Rasmi aheyn

Meelaha aan Rasmiga aheyn

## Caasimadaha aan Rasmi aheyn




Maamulka gobolka wuxuu bixiyaa adeegyo badan oo taageero gobolkoo dhan, kaasoo daboolaya kuwa ku nool magaalooyinka deegaanka ee lagu arkayo qeybta casaanka ah ee qariirada iyo meesha aan rasmiga aheyn oo qeybta cagaaran. Kuwaan waxaa ka mid ah waxyaabaha sida caawinta adeega bulshada, barnaamijyada caafimaadka, daryeelka koriinta, adeegyada illaalada dadka weyn, baaritaanada cuntada iyo maqaayada, iyo doorashooyinka.

## Meelaha aan Rasmiga aheyn



Kuwa ku nool meesha aan rasmiga aheyn, maamulka Gobolka ayaa masuul ka ah waxyaabaha ay dowlada caasimada si caadiyan ah u sameyso, sida bixinta booliiska iyo illaalada dabka sidoo kale sida dayactirka darjiimaha, maktabadaha iyo wadooyinka.

# Halkee ayay Maalgelinta Ka imaataa?






# Nidaamka Miisaaniyada

Gobolka wuxuu la shaqeeyaa xubnaha bulshada sannadkoo dhan si ay uga caawiyaan qaabeynta barnaamijyada iyo adeegyada iyo ogeysiinta miisaaniyada.

Booqo **engage.sandiegocounty.gov** si aad uga qeybgashid.

- Madaxa Sarkaalka Maamulka Ku meel gaarka ah wuxuu u soo gudbiyay miisaaniyad lagu taliyey Guddiga Kormeerayaasha oo bisha Maajo ah.
- Bandhigyada miisaaniyada waxaa lagu wadaagaa Guddiga Kormeerayaasha iyo kulamada bulshada.
- Jawaab celinta dadweynaha waxaa lagu bixiyaa onleenka iyo dhageysiyada dadweynaha.
- Miisaaniyad dib loo eegay ayaa la diyaariyay.
- Guddigu wuxuu ka doodaa oo ansixiyaa miisaaniyada dhaqan galeyso 1-da Luuliyo.

# Taariiqaha Muhiimka ah

**Maajo 2**
Miisaaniyada lagu Talliyay waa la Fasaxay
**faalooyinka onleenka way furantahay**

**Maajo 14 & 16**
10 AM
Bandhigyada Miisaaniyada ee Guddiga Kormeerayaasha

**Maajo 23 saacada** 5:30 PM
**Maajo 29 saacada** at 6 PM
Kulamada Miisaaniyada Bulshada

**Juun 4 saacada** 9 AM
**Juun 6 saacada** 5:30 PM
Dhageysiyada Dadweynaha ee Miisaaniyada Lagu talliyay

**Juun 13**
5 PM
Dhageysiyada Miisaaniyada ee sida Rasmiga ah u Dhamaanayo
**faalooyinka onleenka way xirantahay**
Miisaaniyada Lagu talliyay ee Dib loo eegay ayaa la Fasaxay

**Juun 25**
Dheelitirka Qaadashada iyo Miisaaniyada

**Warbixin badan**

## Sida looga Qeybgalo

Dib u eeg oo ka Faalow: Maajo 2 - Juun 13

- **Onleenka ee** engage.sandiegocounty.gov/countybudget24-26
- **I-meelka** engage@sdcounty.ca.gov
- **Kulamada bulshada:** Maajo 23 saacada 5:30 p.m. ee Xarunta Howlgalada Gobolka, Maajo 29 saacada 6 p.m. onleenka.
- **Taleefonka ama qof ahaan ee** Juun 4 & 6 Dhageysiga Guddiga Kormeerayaasha: sandiegocounty.gov/cob/bosa/
- **Codsiga fasiraada kulamada:** (619) 531-5434 ama PublicComment@sdcounty.ca.gov

**Daawo Kulamada Kormeerayaasha Bulshada**

sandiegocounty.gov
@SanDiegoCounty
@countysandiego
@sandiegocounty

GOBOLKA SAN DIEGO

# Wadarta Miisaaniyada Lagu talliyay:$8.48 bilyan

## Sannadka Maaliyada 2024-25

| Qaybta | Qadarka | Boqolley |
| --- | --- | --- |
| Adeegyada Caafimaadka iyo Insaanka | $3,441.1M | (40.6%) |
| Isticmaalka Dhulka iyo Deegaanka | $796.0M | (9.4%) |
| Badqabka Dadweynaha | $2,739.0M | (32.3%) |
| Maaliyada iyo Dowlada Guud | $927.2M | (10.9%) |
| Sarkaalka Maaliyada | $447.3M | (5.3%) |
| Barnaamijka Caasimada | $132.9M | (1.6%) |

- Kordhinta $317.7 milyan ama 3.9% oo inta lagu jiro Sannadka Maaliyadeed 2023-24 Miisaaniyada La qaatay.
- Tan waxay muujisaa xeelada guud ee lagu waarinayo adeegyada aasaaska Gobolka, lagu xadeeyo kobaca barnaamijyada waajibka ah, ka shaqeynta xarumaha cusub ee Gobolka oo si waxtar ah loo maareeyo kobaca shaqaaleysiinta.

# Wadarta Shaqaalaha Lagu talliyay: 20,459.25

## Sannadka Maaliyada 2024-25

Adeegyada Caafimaadka iyo Insaanka

8,243.50

(+10/+0.1%)

Isticmaalka Dhulka iyo Deegaanka

2,161.75

(+44/+2.1%)

Badqabka Dadweynaha

8,077.00

(+12/+0.1%)

Maaliyada iyo Dowlada Guud

1,977.00

(+6/+0.3%)

Kordhinta 72 boosas ama 0.4% oo inta lagu jiro Sannadka Maaliyadeed 2023-24 Miisaaniyada La qaatay.




GOBOLKA SAN DIEGO

# Qodobada Miisaaniyada

# Kaabayaasha

**Wadooyinka, maktabadaha, darjiimada iyo hormarinada kale ee bulshada.**

- Wadar dhan $132.9 milyan doolar oo bixinayo xarumo cusub iyo dayactirka kuwa jiray si ay ugu ogolaato shaqaalaha inay sii wadaan bixinta adeega macmiilka heerka sare.
- Wadar dhan $480.8 milyan doolar oo Shaqooyinka Dadweynaha ee lagu dhisayo iyo lagu joogteynayo wadooyinka oo lagu maareynayo degmooyinka nadaafada iyo xakameynta fatahaada gobolka.
    - Kordhin ah $40.5 milyan doolar oo wadarta $189 milyan doolar oo badqab wadooyinka oo ay ku jiraan nalalka taraafikada, jidgooyada, isgoysyada dadka socdaan, deyrka wadada iyo jidadka socodka dhinaca ee cusub iyo leemanka baskiilada.
    - $4.7 milyan doolar oo looga hortagayo fatahaada duufaanta iyadoo lagu joogteynayo badqab iyo nadiif biyo mareenada, kanaalada, taagaga iyo biyo galada.
    - Kodhin ah $4.5 milyan oo wadarta $65.5 milyan oo lagu dayactirayo 2,000 mayl oo wadooyinka aan rasmiga aheyn.

# Qodobada Miisaaniyada

## Kaabayaasha

*(sii socoto)*

- Wadar dhan $75.8 milyan oo loogu tallogalay Darjiimada iyo Madadaalada si sare loogu qaado caafimaadka iyo fayo qabka, bulshooyin badqab ah iyo habka rayidka oo loo marayo kumanaan barnaamijyo.
    - Wadar dhan $33.5 milyan oo looga howlgalo 157 xarumo darjiin, 58,000 hektaro oo dhulka darjiinka iyo 389 mayl oo jidad ah.
    - $20.2 milyan si loo ilaaliyo kheyraadka dabiiciga ah, loo ilaaliyo deegaanka loona wanaajiyo xaaladaha deegaanka, oo ay ku jirto dooxada Tijuana.
- Wadar dhan $66.6 milyan oo Maktabada Gobolka oo bixinayo xarunta qof ahaanta iyo muuqaalka ee waxbarashada, madadaalada iyo dhaqanka.
    - $22.8 milyan oo Maktabada cusub ee Casa de Oro.
    - $12.4 milyan oo lagu hagaajiyo aqabyada maktabada, dhijitaalka iyo daabacaada.
    - Kordhinta $569,000 looga howlgalayo 33 laamood oo maktabado ah, 4 maktabada wareego ah iyo 5 dukaamada maktabada tooska ah.

# Qodobada Miisaaniyada

## Caafimaadka Dabeecada

**Caafimaadka maskaxda iyo taageerada isticmaalka maandooriyaha.**

- In ka badan $1.1 bilyan oo maalgashiyada guud ee Adeegyada Caafimaadka Dabeecada.
    - Kordhinta $28 milyan oo isticmaalka maandooriyaha deegaanka iyo adeegyada bukaan socodka.
    - $25 milyan oo lagu balaarinayo iyo lagu taageerayo shaqaalaha caafimaadka dabeecada dadweynaha taasoo ay ku jiraan hormarinta tababar cusub iyo barnaamijka waxbarashada.
    - Kordhinta ah $15 milyan oo lagu hirgelinayo Senate Bill 43 oo daaweynta Caafimaadka Dhaqanka Aan iqtiyaarka aheyn.
    - In ka badan $9 milyan oo lagu bixinayo adeegyada Xarunta Caafimaadka Cusub ee Tri-City ee Xarunta Caafimaadka Maskaxda.
    - Kordhinta ah $4 milyan oo wadarta $11.1 milyan oo wax looga qabanayo dhibaatooyinka daawada daroogada.
    - Inka badan $4 milyan oo ka hortaga isdilka dhalinyarada.

# Qodobada Miisaaniyada

# Guri la'aanta

**Helitaanka hoyga, guriyeynta iyo adeegyada kale ee lagu hubinayo dadka inay haystaan meel badqab ah oo ay ku noolaadaan.**

- Wadar dhan $98.7 milyan oo lagu taageero dadka halista ugu jiro guri la'aanta, bulshooyinka muhaajirka iyo qaxootiga iyo kooxaha kale ee nugul si sare loogu qaado sinnaanta oo dhammaan dadka ku nool gobolka.
  - $15 milyan oo Barnaamijka Caawinta Guri la'aanta Goboleedka.
  - Kordhinta ah $7.8 milyan oo lagu caawinayo kuwa la kulmayo guri la'aanta San Diego iyo sariiraha wabiga Sweetwater.
  - Goobta baakin badqab ah oo labaad ayaa laga filayaa in la furo kuleelaha 2024, taasoo la kordhinayo dooqyada guriyeynta degdega ah oo bulshooyinka aan rasmiga aheyn.

# Qodobada Miisaaniyada

# Guriyeynta

**Fursadaha guriyeynta ee lagu daboolayo baahiyaha bulshada.**

- Wadar dhan $90.9 milyan oo Adeegyada Guriyeynta iyo Hormarinta Bulshada si ay u siiso illaha guriyeynta ee loogu tallogalay dadka nugul, loogu sameeyo guryo la goyn karo oo taageero leh, oo looga caawiyo gaarista isku filnaanshaha qoysaska.
    - $10.6 milyan oo maalgelinta cusub ee loogu tallogalay *Innovative Housing Trust Fund* si ay uga caawiso dhisida guryo la goyn karo.
    - Kordhin ah $2.4 milyan oo lagu xoojinayo guryaha kirada qoyska badan ee ku sugan meesha aan rasmiga aheyn.
    - $500-oo kabida kirada bil-laha ah ayaa ku sii socdo ku dhawaad 400 oo dadka waayeelka ee halista ugu jiro guri la'aanta, culeyska kirada oo u baahan gargaarka dhaqaalaha.
- Wadar dhan $58 milyan oo Adeegyada Qorsheynta iyo Hormarinta oo lagu dheelitirayo bulshada, danaha dhaqaalaha iyo deegaanka si loo hubiyo tayada ugu sareyso ee nolosha oo dhammaan gobolka.
    - $30.1 milyan oo lagu fududeynayo guriyeynta iyadoo la sameynayo barnaamijyada guryaha la goyn karo oo laga saarayo caqabadaha guriyeynta loo marayo waxyaabaha sida dib u eegida qorshaha la damaanad qaaday waqtiyada gaarayo 100% oo mashaariicda guriyeynta a goyn karo.

# Qodobada Miisaaniyada

# Adeega Taageerada

**Nafaqada, caafimaadka, dhaqaalaha iyo barnaamijyada kale ee caawinayo shaqsiyaadka iyo qoysaska nugul.**

- $812.2 milyan oo Adeegyada U qalmida/Isku Filnaanta ee ka caawinayo bixinta helitaanka cuntada, daryeelka caafimaadka, guriyeynta iyo gargaarka guud oo dadka aan laheyn qaababka kale ee taageerada.
- Kordhinta ah $2 milyan oo lagu balaarinayo amniga cuntada oo loo marayo beeraha bulshada, waxbarashada nafaqada, cuntooyinka, goobaha cuntada iyo faa'idooyinka la aqbali karo ee EBT ee 18 suuqyada beeraha shahaadeysan.
- In ka badan $200 milyan ee loogu tallogalay Adeegyada Taageerada Guriga dhexdiisa si ay u siiyaan caawin dadka weyn nugul.
- Goobta ku taalo Caasimada Qaranka waxay u adeegeysaa sida goobta mustaqbalka ee Xarunta Cadaalada Qoyska Gobolka Koonfureed oo waxay siiyaan dhibanayaasha dambiga deegaanka inay helaan adeegyada soo kabsiga naxdinta oo hal meel ah.
- $145 milyan maalgashiga caafimaadka iyo caafimaadka damiirka ee loogu tallogalay dadka weyn ee xiran.
- $9 milyan maalgashiga caafimaadka iyo caafimaadka damiirka ee loogu tallogalay machadyada.

# Adeega Taageerada

*(sii socoto)*

- Kordhin ah $2.2 milyan oo lagu caawinayo halyeeyada u baahan taageerada muddada dheer si looga fogaado hay'adeynta.
- $479 milyan ee loogu tallogalay Fayo qabka Carruurta iyo Qoyska si loo siiyo adeegyada xoojinta iyo ka hortaga qoyska si la iskugu hayo qoyska, iyo adeegyada illaalada carruurta.
    - In ka badan $158 milyan oo loogu tallogalay qoysaska taageerayo carruurta la koriyo iyo la korsaday.
    - Kordhin ah $2 milyan oo loogu tallogalay ka hortaga ku xadgudubka carruurta.
    - Kordhin $2 milyan oo lagu caawinayo dhalinyarada ka tageyso daryeelka koriyaha oo leh guriyeynta ku meelgaarka ah.
    - Xarunta Ka hortaga Cusub ee ka caawinayo qoysaska ka hor intaysan gaarin barta masiibada.
- $11.3 milyan oo loogu tallogalay Adeegyada Xayawaanada, oo ay ku jiraan $1.3 milyan, sadex shaqaale waqti buuxo iyo rugta caafimaadka xoolaha ee loogu tallogalay aagaga matalaad la'aanta ah ee ku yaalo meelaha aan rasmiga aheyn.

# Qodobada Miisaaniyada

# Dib u habeynta Cadaalada

**Wax ka bedelka nidaamka cadaalada si loo hubiyo sinnaanta iyo isla.**

- In ka badan maalgashiga wadar dhan $230 milyan ah ee *Badelada Xariga* ee lagu yareynayo dad weynaha xabsiga oo lagu illaalinayo badqabka dadweynaha iyadoo loo marayo qorsheynta ka hortaga, leexinta iyo dib u gelida.
    - $3.6 milyan oo *Taageerada Dib u gelida Xiriirinta Daryeelka Bulshada oo* ki xirayo dadka ku lugleh cadaalada ee qabo baahiyaha weyn ee adeegyada daryeelka ku saleysan sida guriga, caafimaadka damiirka iyo daaweynta isticmaalka maandooriyaha, daryeelka caafimaadka iyo shaqada iyo waxbarashada.
    - $3.3 milyan oo loogu tallogalay Qeybta Adeegyada Guud ee Difaaca Dadweynaha ee isu keeno dhaqaatiirta, qiimeeyayaasha ku xadgudubka maandooriyaha iyo qorsheeyayaasha guriyeynta si ay u caawiyaan macaamiisha.
    - $2 milyan oo loogu tallogalay *Hindisaha Weecinta Dhallinyarada* ee Xeer Illaaliyaha Degmada kaasoo ka caawiyo inay ka illaaliyaan dhalinyarada iyo dhalinta ka yar 18 sanno jirka nidaamka cadaalada dhalinyarada iyadoo wax laga qabanayo sababta aasaaska dabeecada waxyeelada leh.
- $7 milyan iyo 43 shaqaale waqti buuxo ee loogu tallogalay Machadka Hormarinta Dhalinyarada ee guriga, gaariga iyo dhaqancelinta dhalinyarada ku jirto nidaamka cadaalada.

# Qodobada Miisaaniyada
# Badqabka Dadweynaha

**Fullinta Sharciga iyo illaalada dabka.**

- In ka badan $2.7 bilyan oo wadarta maalgashiga loogu tallogalay Badqabka Dadweynaha.
  - $87.1 milyan oo adeegyada dabka, caafimaadka gurmadka iyo ambalaansaha.
  - Kordhin ah $16 milyan ee loogu tallogalay dabka, adeegyada gurmadka iyo ambalaanshaha ee meesha aan rasmiga aheyn.
  - $4 milyan ee loogu tallogalay Baaraha Caafimaadka ee wax looga qabanayo dacwadaha batay ee dhimashada sabab la xiriirto iska badinta fentanyl.
  - $5 milyan oo lagu bilaabayo badelida Boosteejada hoose Ramona Sheriff ee 50-jirsatay.
  - $400,000 ee loogu tallogalay 80 Saldhiga Dabka Ramona dib loo qaabeynayo iyo daarta tababarka dabka.
  - $500,000 ee loogu tallogalay Barnaamijka Ka hortaga Rabshada Qoriga.
  - 2 shaqaale waqti buuxo ayaa lagu daray Qeybta Dambiyada Dhaqaalaha ee Xafiiska Qareenka Degmada.
  - $51 milyan oo sare loogu qaadayo xarumaha xabsiga dadka weyn.
  - $6.3 milyan ee loogu tallogalay hormarinada Xarunta Xabsiga Dhalinyrada East Mesa.

# Qodobada Miisaaniyada

# Caafimaadka iyo Illaalada Dadweynaha

**Ku haynta bulshooyinka si caafimaadan iyo ka hortaga jirooyinka.**

- $291.8 milyan ee loogu tallogalay Adeegyada Caafimaadka Dadweynaha si looga hortago cudurada faafa iyo faafida cudurada oo loogu dhiirogeliyo dabeecado caafimaadan oo ay wehliyaan hubaalsiinta helitaanka adeegyada caafimaadka oo dhammaan Xarumaha Caafimaadka Dadweynaha, barnaamijyada booqashada guriga, iyo adeegyada farmashiiga.

- Maalgelinta joogtada ah ee lagu dhisayo sheybaarka caafimaadka dadweynaha farshaxanka cusub ee gobolka oo baarayo cudurada caabuqa.

- Maalgelinta iyo shaqaalaha laga howlgelinayo labo baabuur cusub oo Live Well on Wheels.

- $55.5 milyan oo Tayada Deegaanka iyo Caafimaadka si loo illaaliyo tayada deegaanka, oo sare loogu qaado wacyigelinta deegaanka oo loo hubiyo cabashada sharciyada maxaliga, gobolka iyo deegaanka faderaalka.
    - Wadar dhan $15.6 milyan oo baareyso maqaayadaha iyo xarumaha kale ee cuntada.
    - Wadar dhan $14.8 milyan oo sharciyeyneyso 14,000 oo howlgalada walxaha halista ah si looga hortago gaarista daadashooyinka.
    - Wadar dhan $1.5 milyan oo baaritaan iyo soo sheegida tayada biyaha xeebta iyo gacanka.

# Waarista Waaritaanka

**Illaalinta deegaanka dabiiciga ah ee looga dhowrayo jiilalka mustaqbalka.**

- Kordhin ah $18.2 milyan oo lagu illaalinayo harka biyaha gobolka iyo mashaariicda kaabayaasha cagaarka ah.
- $16 milyan oo lagu dhowrayo dhulka si loo illaaliyo xayawaanada sida qeyb ka ah Barnaamijka Dhowrista Xayaawanada Kala duwan.
- Wadar dhan $2.5 milyan oo lagu cusbooneysiinayo Qorshaha Tallaabada Cimilada.
- $2 milyan oo lagu beerayo 4,000 geedo cusub oo hantida Gobolka ee lagu yareynayo gaasaska aqalka dhirta.
- $1.8 milyan oo lagu rakibayo saldhigyada jaajgareynta baabuurta cusub ee elektarooniga ah.
- $1 milyan oo lagu hormarinayo Qorshaha Kaarboon La'aanta ah ee lagu yareynayo qiiqa kaarboonka ee xarumaha Gobolka oo boqolkiiba 90% xiliga 2030.

# Qodobada Kale

- $9 milyan oo lagu hormarinayo qadka intarneetka ee meelaha baadiyaha ee gobolka.

- $4.9 milyan oo Qiimeynta Xafiiska, Waxqabadka iyo Falanqeynta lagu daraasadeynayo xogta Gobolka si loo ogaado naqshadaha iyo isbadelada ka caawin karo hogaamada inay wanaajiyaan barnaamijyada, adeegyada iyo xeerarka.

- $1.3 milyan oo loogu tallogalay Xafiiska Heerarka Shaqada iyo Fullinta shaqada ee bulshooyinka iyo ganacsiyada lagu hormarinayo heerarka shaqada, oo lagu xaqiijinayo cabashada iyo taageerada dhibanayaasha xatooyada mushaarka.

- $500,000 oo lagu balaarinayo Barnaamijka Sinnaanta Bulshada ee wax looga qabanayo waxyeelada aan dheelitirneyn ee ay sababtay Dagaalka Daroogada ee bulshooyinka midibka iyadoo la siinayo helitaanka dhaqaalaha iyo sinnaanta warshadaha xashiishka.

- $500,000 oo lagu hirgelinayo hindisooyinka Uplift Boys & Men of Color si loo siiyo qaab guud oo loogu xiro dhalinyarada halista ku jirto adeegyada gaarsiinta, nidaamyada taageerada naxdinta iyo fursadaha hormarinta shaqaalaha.

GOBOLKA SAN DIEGO

**www.sandiegocounty.gov**

1600 Pacific Highway, San Diego, CA 92101